Waaxda Shaqaalaha EE U.S.

OSHA®

Badbaadada shaqooyinka iyo Helida Caafimaad

# Badbaada Shaqolyo Caafimaad WAA SHARCIGA!

**Dhamaan shaqallaha ayaa xaq u leh:**

- Goob shaqo amaan ah.
- Kala hadal walaaca bad baadada iyo caafimaadka shaqo bixiyahaaga ama OSHA, ama kasoo warbixi dhaawaca ama xanuunada shaqada la xiriiro, adigoon lagaa aargosan.
- Hel warbixinta iyo tobabaro ee halista shaqo, oo ay ku jirto walxaha halista ee goobtada shaqo laga helo.
- Codso baaritaanka qiimeynta OSHA oo sir ah oo lagu sameyo goobtada shaqo haddii aad aaminsan tahay in xaalado caafimaad daro iyo halis aan amaan aheyn jiran. Waxaad xaq u leedahay wakiil aad kala hadasho OSHA oo adiga ku matalo.
- Ka qeyb qaado (ama wakiilkaaga haka qeyb qaato) qiimeynta baaritaan ee OSHA si qaas ahna ula hadal baaraha.
- Cabasho usoo gudbi OSHA 30 maalin gudahood (adigo kula hadlaya taleefan, onleyn, fariinta boosto) haddii lagaaga aargostay xaquuqdaada oo aad isticmaashay.
- Fiiri haddii ay jirto xigasho-carababid danbiyada OSHA ay siisay shaqaalleysiyahaaga.
- Waxaad codsataa nuqul keyda warbixinta caafimaadkaaga, baaritaanada qiimeya halista goobta shaqo, iyo diiwaanka dhaawacyada iyo xanuunada goobta shaqo.

*Boorkan ayaad si bilaash ah uuga heli kartaa OSHA.*

***La so xiriir OSH. Waan ku caawin karnaa.***

**Shaqo bixiyuhu waa ku qasab:**

- In uu shaqaallah siiyo goob shaqo ka xor ah dhamaan halisa la wada aqoonsan yahay. Waa sharci daro in laga aargoosto shaqaalle isticmaalaya xaqiisa uu sharciga u ogol yahay, waxaa kamida kala hadlida walaaca caafimaad iyo bad baado adiga iyo OSHA, ama soo gudibinta dhaawaca iyo xanuunada goobta shaqo.
- Adeecida dhamaan shuruudaha sharci ee OSHA.
- Soo ogeysii OSHA 8 saacadood gudaheed dhimashada goobta shaqo ama 24 saac gudaheed isbitaal dhigida shaqsi, xubin hadde go'do, ama il dhacdo.
- In aad ku siiso tobabarka shaqaallaha u baahan yahay luuqad iyo erayo ay fahmi karaan.
- Si wanaagsan ugu soo bandhig boorkan goobta shaqo.
- Ku dhaji xigashooyinka-carababida danbiyada OSHA goobta ama meel u dhaw goobta uu xadgudubku ka dhacay.

Adeeg latalin ee goobta-shaqo ayee heli karaan shaqo bixiyayaasha yar yar iyo kuwa dhex dhexaadka ah, ee aan laheyn xigashoyinka xad gudub ama xukun ciqaab, ayagoo ka helaya mashruucayada latalinta OSHA ee gobol walbo.



**1-800-321-OSHA (6742) • TTY 1-877-889-5627 • www.osha.gov**

OSHA 4273-07 2023
It's the Law — Somali

Source: OSHA (osha.gov) | Traduit par https://hseacademy.online/